

## Xaqiraadda Goobta Shaqada

### Shaqaalaha Joogtada-Aheyn iyo Kuwa Ku-meelgaarka ah

Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario wuxuu farayaa in qof waliba uu xaq u leeyahay in lagu dhaqo sinaan iyo caadaalad oo marnaba uusan goobta shaqada kala kulmin xaqiraaad u sabab ah midabkiisa, asalka-heybtiisa, gobolkiisa, qoladiisa, muwaadinimadiisa, diintiisa, jinsigiisa, dooqiisa-galmada, curyaanimadiisa, cimrigiisa, xaaslenimadiisa, heer-bulshadeedka qoyskiisa iyo inuu ku qoran yahay diiwaanka denbiyada.

#### Ma-badbaadsan tahay Xuquuqdaada?

Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario waxuu farayaa in qofka ku shaqeyo jawi ka maran xaqiraad iyo hadadaadba. Sugista xuquuqda aadamiga shaqsiga marnaba kuma xirna in shaqqaluhu uu yahay shaqaale ku-meel-gaar-ah, shaqaale-aan-joogteysneyn, shaqaale hey'adaha-shaqagelinta soo dirtay, shaqaale kunturaadle ah, ama inaad tahay qof iska-wax-u-qabso ku shaqeeya. Shaqo-bixiyuhu waxaa waajib ku ah, inuu xil weyn iska saaro, uuna si buuxda u hirgeliyo Xuquuqda Aadamiga shaqaalaha. Waa mamnuuc in shaqo-bixiyuhu ku mar-marsiyoodo in shaqaaluhu uu yahay qof-iskiisa-u-shaqeysta. Maadaama Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario uu yahay mid dadkoo dhan uu isku si' u saameeya, xuquuqda aadamiga marnaba lama garab mari karo xitaa haddii ay sharuucyo qaarkood, sida Sharciga Shaqaaleynta (*Employment Standards Act*), *uusan qofkaasi u qeexneyn "shaqaale" ahaan.*

#### Badbaadinta Xuquuqda Shaqaalaha Saacadaha Shaqada ka-dib

Dhowrista Xuquuqda Aadamiga shaqaalaha kuma koobana saacadaha shaqada lagu jiro iyo goobta shaqada oo keliya. Mathalan, haddii aad qof madax ku ah ku aflagaadeeyo ama damac-jireed kuula yimaad adigoo kullaan shaqo la leh goor habeenimo, Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario ayaad la tiigsan kartaa.

#### Shaqaalaha Guriga

Dadaka uga shaqeeya guriga dhexdiisa ama agagaarkiisa, sida caruur-hayaha, cunno-kariyaha, guri nadiifiya iyo beer-jarahaba, waxaa giddigood badbaadinaaya isla sharciga Xuquuqda Aadamiga.

#### Muddada Shaqada iyo Qaabka Shaqo-qorista

Isla sharciga xuquuqda aadamiga ayaa badbaadinaayaa shaqaale ku-meel-gaar-ah ama shaqaale-aan-joogteysneyn iyadoon marnaba la eegin muddada uu qofkaasi u shaqeeyay hey'adaasi iyo nooca hoshaha uu ka qabatayba. Mathalan, haddii xuquuqdaada aadamiga meel looga dhaco adigoo ka shaqeynaya xafiis lagu qoray inaad nadiifiso muddo shan cisho oo keliya, waxaa weli ku badbaadinayaa isla sharciga shaqaalaka kale. Sidoo kale, haddii aad meeshaasi uga shaqeyn jirtay shaqaale ku-meel-gaarka ah, kadibna aad noqotay shaqaale joogto ah, weli isla sharcigii ayaa ku badbaadinaaya.

#### Arjiga Shaqo-Qorista iyo Kullanada Shaqo-Qorista

Shaqo bixiyaha waxuu ku weydiin karaa "Ma leedahay waraaqaha sharciga ah ood Kanada uga shaqeyn laheyd?" Haddii kale, shaqo-bixiyahu kuma weydiin karo su'aalo kale oo la xiriira sharciga, sida sawiro, meesha aad ku dhalatay, sannadka aad dhalatay, xaaladdaada socdaalka "jaaliyadda" aad ka tirsan tahay.

#### Xilliga Tijaabada

Sharciga Xuquuqda Aadamiga wuu mamnuucayaa in qof shaqaale ah la xaqiro ama la ruqseeso muddada uu tijaabada ku jiro. Sidoo kale, sharciga wuxuu shaqo-bixiyuhu farayaa in marka uu meeleynay shaqaalaha inuu tixgelinaayo baahidiisa qaaska ah, siiba haddii baahidaasi ay ka mid tahay shuruudaha sharciga ku xusan. Bahida gaarka ah, waxey noqon kartaa mid la xiriira curyaanimada qofka ama xaaladda gaarka ah ee waalidka keli-koriyaha ah. Mathalan, haddii qofku uu dhegaha ka culus yahay, hey'adda waxaa waajib ku ah iney telefoonkiisa ugu xirto samaacadda codka kordhisa.

### **Badbaadinta Kunturaadyda iyi Sharciga**

Kunturaadku waa heshiis qoraal ama oraah ah oo sharcigu badbaadinayo, sidaas awgeed, kunturaadyada waxey ka mid yihiin meelaha uu Sharciga Xuquuqda Aadamiga Ontario badbaadinaayo. Sidaas darteed, xaaladaha iyo shuruudaha shaqada ood kala doodid shaqo-bixiyahu, sida mushaharka ama saacadaha shaqada, waa qeyb ka mid ah kunturaadka. Sharciga ayaa xaddidaaya maamulka noocyada kunturaadyada kala duwan, ha ahaado qandaraasle madax banaan, ama cid qandaraas la gashay kunturaadle kale. Qof kasta oo buuxin kara shuruudaha kunturaadyada ee sharciga ku xusan, wuxuu xaq u leeyahay inuu ka badbaado xaqiraadyada sharciga lagu xusay.

### **Maxaa leyga rabaa inaan sameeyo?**

- Dhacdada xusuus-qor ka sameyso – qorista tafaasiisha dhacdada waa muhiim
- Raadi oo hel qoraal kasta oo kiiskaaada saacidi kara - sida waraaqaha qandaraasyada iyo emailada
- Miyey jiraan cid marqaati ah? Miyey jiraan dad kale oo la xaqiray ama la aflagaadeeyay? La hadal dad aad kalsooni ku qabto.
- Haddii aad qof madax wada hadasheen, qoraal ka samee wax kasta oo ay sameeyeen ama ayan sameyn – Waxaa suura gal ah iney iyaga laftood ay arrintu ka mas'uul ka yihiin

### **Halkee ka heli karaa gargaar?**

#### **Xarunta Dhexe ee Ka-Gargaarka Shuruucda Xuquuqda Aadamiga**

Kala soo xiriir Xarunta Dhexe ee Ka-Gargaarka Shuruucda Xuquuqda Aadamiga cinwaanka hoos ku cad, haddii aad la kullanto fal xaqiraad ah una baahan tahay talobixin sharciyeed oo lacag la'aan ah, si aad arji daco ah ugu qorto, Maxkamadda Xuquuqda Aadamiga Ontario. Sidoo kale, haddii aad dooneyso inaad xalliso arrin isla sharciga Xuquuqda Aadamiga u aqoonsaday inuu yahay fal xaqiraad ah.

Xarunta Dhexe ee Gargaarka Shuruucda Xuquuqda Aadamiga

400 University Avenue, Dabaqa 7aad

Toronto, Ontario M7A 1X8

Telefoon: (416) 314-6266

Telefoonka Dhagoolka: (416) 314-6651

Telefoon Lacag La'aan ah: 1-866—625-5179

Telefoonka Dhagoolka oo La'aan ah:: 1-866 612-8627

[www.hrlsc.on.ca](http://www.hrlsc.on.ca)

Haddii aad doneyso inaad kullan-shaqsi ah lagula yeesho, nagala soo xiriir telefoonnada kor ku xusan. Haddii aad deggan tahay banaanka Magaalo Weynta Toronto, telefoonka inagala soo xiriir si aan uga wada hadalno qaabka aan baahidaada u haqab tiri laheyn. Waxaan ku dadaali doonaa inaan sida ugu haboon iyo isla jaaliyadaada in adeegyadeena lagu soo gaarsiyo. Waxaan adeegyadeena ku bixinaa 140 luqadood.

### **Xarunta Dhexe ee Howlgallada Shaqaalaha**

Xarunta Dhexe ee Howlgallada Shaqaalaha waa urur u daneynayo shaqaalaha una taagan inuu horumariyo noloshu shaqaalaha iyo dadka muruq-maalka ah oo mushaharada yar qaata, ama qabta shaqooyinka aan joogtada ahqeyn. Waxaan rabnaa inaan sugno in shaqaalaha ay cod buuxa ku leeyihiin goobta shaqada, isla markaana ay helaan karaamada iyo cadaalada ay mudan yihiin. Cinwaanka xarunta waa sida hoos ku cad:

Cinwaanka Xarunta Dhexe ee Howlgallada Shaqaalaha waa

720 Spadina Avenue, Qolka 223

Toronto ON M5S 2T9

Telefoonka: (416) 531-0778

Fakiska: (416) 533-0107

E-mail: [info-AT-workersactioncentre.org](mailto:info-AT-workersactioncentre.org)

<http://www.workersactioncentre.org>